



## WARGELIN DADWEYNE

**Bankiga Dhexe ee Soomaaliya** wuxuu dadweynaha ku wargelinayaa in Xawaaladda **Globalex** ay si iskeed ah u go'aansatay in ay joojiso adeeggii Xawaaladeed ee ay dalka ka bixin jirtay.

Xawaaladda Globalex waxay shati xawaaladeed (Money Transfer Business License) lambarkiisu yahay **MTBL 2025-011** ka qaadatay Bankiga Dhexe ee Soomaaliya sanadkii 2017.

Haddaba, waxa lagu wargalinayaa dhammaan dadwaynaha in haddii ay jiraan macaamiil qaan ku leh Xawaaladda **Globalex** ay kala xariiraan **lambarka: +252 619621209** iyo **emailka: globalexmoneyt@gmail.com**. Ayaga oo nuqul la socodsiin ah siinaya **Waaxda Shati-siinta iyo Kormeerka ee Bankiga Dhexe ee Soomaaliya**, kuna hagaajinaya **Emailka: licensing@centralbank.gov.so**, ugu danbayn **31<sup>-ka</sup> Agoosto 2025**.

Muddadaas kor ku xusan kadib, Bankiga Dhexe wuxuu si rasmi ah u baabi'in doonaa shatiga Xawaaladda **Globalex**.



**Wixii faahfaahin dheeri ah kala xiriir:**

**Email:** [Communications@centralbank.gov.so](mailto:Communications@centralbank.gov.so)

**Website:** [www.centralbank.gov.so](http://www.centralbank.gov.so)